**War** saxaafadeed

# Alberta ayaa u Furan Qorshaha Xagaaga

Maayo 26, 2021

## Dowladda Alberta waxay ka saari doontaa seddex marxaladood ee talaabooyinka caafimaadka ee gobolka oo dhan maadaama bartilmaameedyada tallaalka la gaarey isbitaal dhigiddana ay hoos u dhaceyso.

Furitaanka Qorshaha Xagaaga ee Alberta (Alberta's Open for Summer Plan) waxay bixineysaa khariidad saddex waji leh oo looga qaadayo xayiraadaha caafimaadka iyo dib ugu soo noqoshada caadiga.

Qorshaha wuxuu reer Alberta siinayaa sawir cad oo xagaaga ah bilaa xaddidaad inta reer Alberta ay sii wadaan inay raacaan talaabooyinka caafimaadka bulshada muddada gaaban isla markaana lambarrada tallaalka ay si dhakhso ah u kordhayaan.

Furitaanka Qorshaha Xagaaga ee Alberta (Alberta's Open for Summer Plan) waxaa ku jira seddex marxaladood oo ku saleysan xadka talaalka iyo isbitaalada:

- Marxaladda 1aad: Laba toddobaad ka dib markii 50 boqolkiiba dadka reer Alberta ee da'doodu tahay 12 iyo wixii ka weyn ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah iyo isbitaal dhigga ee KOOFID-19 oo ka hoose maray 800 hoosna u socda.
- Marxaladda 2aad: Laba toddobaad ka dib markii 60 boqolkiiba dadka reer Alberta ee da'doodu tahay 12 iyo wixii ka weyn ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah iyo isbitaal dhigga ee KOOFID-19 oo ka hooseeya 500 oo hoosna u dhacaya.
- Marxaladda 3aad: Laba toddobaad ka dib markii 70 boqolkiiba dadka Alberta da'doodu tahay 12 iyo wixii ka weyn ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah.

Maaddaama Alberta ay gaartay heerka boqolkiiba 50 ee hal tallaal ah 18 kii Maayo, iyo iyadoo isbitaal dhigista oo aad uga hooseeya 800, Alberta waxay geli doontaa Marxaladda 1aad bisha Juun 1. Iyada oo ku saleysan xawaaraha tallaalka hadda, Alberta waxaa la saadaalinayaa inay gasho Marxaladda 2aad bartamaha June iyo Marxaladda 3aad dhammaadka Juun ama horraantii Julaay. Kuwani waa qiyaas oo keliya waxayna ku tiirsan yihiin dhammaan dadka reer Alberta oo sii wadaya hoos u dhigidda isbitaal dhigidda oona la kordhinayo lambarrada tallaalka.

**Marxaladda 1aad: Laba toddobaad ka dib markii 50 boqolkiiba dadka Albertans ee da'dooda 12 ka weyn tahay ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah oo isbitaal dhigidda ay ka hooseeyso 800 ayna hoos u dhacayso.**

Laga bilaabo May 28:

- Xaddidnaanta tirade dadka ee adeegyada cibaadadu waxay u kordheysaa boqolkiiba 15 degganaanshaha lambarrada dabka.

Laga bilaabo Juun 1:

- Waxaa la kordhinayaa kulamada bulshada ee bannaanka ilaa 10 qofood, oo lana kala fogaanayo.
    - Kulamada bulshada ee gudaha weli lama ogola.

    - Cunto ku cunidda daaradda ee dibedda ayaa dib u bilaabi kara ugu badnaan afar qof miiskiiba. Qof kasta oo miiska fadhiya waa inuu ahaado xubin ka tirsan reerka ama qof kaligiis nool, xafladaha cuntada waxay ku eg yihiin laba qof xiriir oo dhow leh.
    - Kala fogaanshaha jirka iyo xaddidaadaha kale wali wey jirayaan.

- Waxqabadka jirka dibadda iyo howlaha madadaalada waxaa loo oggol yahay ilaa 10 qof oo da'a kasta la kala fogaynayo..
- GoobahaTafaariiqda ayaa kordhineysa boqolkiiba 15 boqolkiiba deganaashaha lambarka dabka (waa iney awood u leeyihiin ilaalinta kala fogaanshaha).
- Adeegyada gaarka iyo fayoqabnimada ayaa dib loo furi karaa, ballan kaliya ah.
- Munaasabadaha arooska waxay lahaan karaan ilaa 10 qof, oo ay ku jiraan dadka maamula, aroosadda/arooska, marqaatiyaasha iyo sawir qaadayaasha. Qaabilaada lama ogola.
- Xafladaha aaska waxay lahaan karaan ilaa 20 qof, oo aan lagu darin shaqaalaha xarunta, wadaadka aaska ama abaabullada looma tixgalin marti iney yihiin. Qaabilaada lama ogola.
- Baahinta shuruudaha iyo xariijinta ayaa wali shaqeynaya.

**Marxaladda 2aad: Laba usbuuc ka dib 60 boqolkiiba Dadka Reer Alberta da'dooda 12ka weyn yihiin ayaa heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah iyo isbitaal dhigidda ay ka hooseyso 500 oo hoosna u dhaceysa.**

- Kulamada bulshada ee dibdda waxay u kordhayaan ilaa 20 qof, oo ay kala fogaanayaan.
- Xafladaha arooska waxay ku dhici karaan ilaa 20 ka qaybgale. Qaabilaada waxaa loo oggol yahay bannaanka oo keliya.
- Munaasabadaha aaska waxaan la ogola yahay ilaa 20 qof oo aan lagu darin shaqaalaha xarunta, wadaadka aaska ama abaabullada looma tixgelin iney marti yihiin. Qaabilaada waxaa loo oggol yahay bannaanka oo keliya.
- Makhaayadaha ayaa fadhiisin kara ilaa 6 qof miiskiiba gudaha ama dibedda.
    - Xadidaadha xafladaha ayaan ku ekeen qoysaska oo keliya.
    - Xadidaadaha kala fogaanshaha iyo xannibaadaha kale wali way jirayayaan.
- Tirada goobaha tafaariiqda ayaa kordhay ilaa saddex meelood meel ee deganaanshaha Xeerka Dabka (waa iney ilaaliyaaa kala fogaanshaha).
- Tirada loogu talagalay meelaha cibaadada ayaa kordhay ilaa saddex meelood meel ee xeerka deganaanshaha dabka.
- Goobaha jimicsiga gudaha oo loogu talagalay howlaha gaarka ah iyo howlaha jirdhiska, oo la tago balan la'aanta ayaa lama huraan ah iney ka qaybgalayaasha isu jirsadaan saddex mitir iyo fasalada jimicsiga ayaa dib u bilaaban.
- Howlaha gudaha waxay u furan karaan ilaa saddex meelood meel ee xeerarka deganaanshaha Dabka, oo ay ku jiraan xarumaha madaddaalada gudaha. Tan waxaa ka mid ah shineemooyinka, tiyaatarada, matxafyada, matxafyada farshaxanka iyo maktabadaha.
- Howlaha dhallinyarada gudaha iyo dibedda iyo isboortiga dadka waaweynba ayaa dib u bilaabi ayadoo jirin xadidaadyo.
- Waxqabadka dhalinyarada, sida xeryaha maalinlaha iyo xarumaha ciyaaraha, waxay dib u bilaaban karaan, iyadoo la raacayo xayiraadaha.
- Adeegyada gaarka iyo fayoqabnimada ayaa dib u bilaabi kara adeegyada balan la'aan.
- Hay'adaha waxbarashada sare ayaa dib u bilaaban karaan waxbarashada qofka inuu imaado.
- Amarka in qofka shaqeeyo isagoo/iyadoo jooga guryahooda ayaa la qaadayaa laakiin weli waa lagu talinayaa.
- Xarumaha fadhiga ee go'an (tusaale ahaan tarabuunka (grandstands) ayaa furi kara tiro ahaa saddex meelood meel oo fadhiga ah.
- Kulumada dibedda waxay u kordheen ilaa 150 qof (tusaale ahaan, riwaayadaha/ciidaha), iyadoo la raacayo xayiraadaha jira.
- Baahinta shuruudaha iyo xariijinta ayaa wali dhaqangal ah

**Marxaladda 3aad: laba toddobaad ka dib 70 boqolkiiba dadka reer Albert da'dooda ka weyn tahay ayey heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah.**

- Xannibaadaha oo dhan waa la qaadayaa, oo ay ku jiraan xayiraada ku saabsan isu imaatinka bulshada ee gudaha.
- Shuruudaha go'doonka ee kiisaska la xaqiijiyay ee KOOFID-19 iyo qaar ka mid ah sii wadidda tallaabooyinka difaaca ee goobaha daryeelka oo sii jirayaan.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xayiraadaha iyo tillaabooyinka jira ayaa la sii dayn doonaa ka hor tallaabo kasta. Dadka reer Alberta ayaa la socon kara horumarka talaalka ee gobolka ee ku saabsan alberta.ca.

Gudbinta KOOFID-19 ee gobolka ayaa sii wadi doona in lagu kormeero inta lagu gudajiro. Haddii loo baahdo, talaabo dib u furitaan ah ayaa la joojinayaa inuu ka jawaabo isbeddellada gudbinta KOOFID-19 ee heerarka deegaanka ka ama gobolka.

Furitaanka waara wuxuu ku xirnaan doonaa dadka reer Alberta oo si buuxda loogu tallaalo laba qiyaasood inta lagu jiro bilaha xagaaga si looga hortago faafitaanka mustaqbalka ee KOOFID-19.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka oo tilaabooyin sax ah u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaad ee Alberta.

## Xaqiiqooyin degdeg ah

- In ka badan 2.55 milyan oo qiyaas oo tallaal ah ayaa hadda laga qaatay Alberta.

## Xogta la xiriirta

- Alberta ayaa u Furan Qorshaha Xagaaga (Alberta's Open for Summer Plan)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo wararka shirarka (Watch the news conference)

## Weydiimaha warbaahinta

Jerrica Goodwin
587-988-3278
Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Premier

Tom McMillan
780-422-4905
Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

*Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx.*

Classification: Public